



*Macluumaadka daadiidka
ardayda dugsiyada*



**Växjö
kommun**

Ilmahaaga waxaa loo oggolaaday gaadiidka ardayda dugsiga waxaana buuggan yar ku jira macluumaad loogu talagalay qofka ilmaha ka ma'suulka ah. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiidka ardayda dugsiga qaada, xeerarka masaafada ama habka go'aan-qaadashada, ka akhriso boggan macluumaad dheeraad ah www.vaxjo.se/skolskjuts

Qaybinta mas'uuliyadda

Waalidiinta ayaa mas'uulka ah ardayda inta ay ka fuulayaan gaadiidka dugsiga ee meesha loogu talagalay inuu ka raaco, iyo sidoo kale markay ay ka soo degaan baabuurka meesha loogu talagalay marka uu dhammaado wakhtiga dugsigu.

Shirkadda gaadiidka ayaa iyada oo u maraysa darawalka mas'uul ka ah ardayda inta ay ku guda jiraan safarka baabuurka iyo marka ay ka soo laabtaan dugsiga, iyo sidoo kale in loo hoggaansamo xeerarka taraafikada ee jira. Haddii ay dhacdo waxyeello ama loola dhaqmo si meel ka dhac ah inta lagu guda jiro safarka baabuurka dugsiga, maamulaha dugsiga ayaa mas'uul ka ah inuu baaritaan ku sameeyo arrintaas.

Xeerarka ammaanka

Dib-u-eegista xeerarka nidaamka- iyo ammaanka iyo sidoo kale tababaro ku saabsan ka bixidda arrimaha degdegga ah ayaa si joogto ah loogu qabtaa ardayda isticmaasha gaadiidka dugsiga. Fuulista baabuurka- iyo ka deggistu waa inay u dhacaan si deggen. Ardaydu waa inay si deggen u fadhayaan inta lagu guda jiro safarka baabuurka. Waa in la isticmaalo suunka badbaadada.

Xeerarka nidaamka

Ardaydu waa inay kuraastooda ku fadhayaan inta lagu guda jiro safarka, waana inay sugaan illaa baska uu ka istaagayo meesha loogu talagalay in lagaga dego.

Ardayda ay khasabka ku tahay inay ka gudbaan waddada markay ka degaan ka dib, waa inay sugaan illaa uu baabuurku ka dhaqaaqayo. Ardaydu waa inay dhegaystaan oo ay raacaan tilmaamaha darawalka. Darawalku waa inuu u soo gudbiyaa maamulka gaadiidka warbixinta ku saabsan wixii tallaabooyin ah ee khaldan.

Qofka baaskiilka ku yimaada goobta gaadiidka laga raacayo waa inuu dhigaa baaskiilkiisa si aanu u hor istaagin dadka lugeynaya ama dadka kale ee isticmaala jidka.

Codsii magdhow lacageed ayaa laga dalban karaa qofka ama dadka waxyeellada u geysta gaadiidka ardayda dugsiga. Falalka waxyeelada ah dhammaantood waxaa dacwad loo gudbinayaa booliiska.

Haddii gaadiidku soo daaho ama uu iman waayo subaxdii

Haddii gaadiidka ardayda dugsiga la waayo xilligii loogu talagalay inuu baxo, waxaad la xiriiri kartaan shirkadda ardayga u qaadda dugsiga.

Guud ahaan, waxaa loogu talagalay inay ardaydu ku laabtaan guriga ama meesha kale oo ay waalidiintu u qoondeeyeen haddii gaadiidka dugsigu uu soo daaho wax ka badan 30 daqiiqo.

Haddii gaadiidku soo daaho ama uu iman waayo gelinka dambe

Ardaygu wuxuu la xiriirayaan shaqaalaha dugsiga, kuwaas oo iyaguna la xiriiri doona maamulka gaadiidka ama mas'uulka qaabilsan gaadiidka dugsiga. Ardaygu waa inuu sii joogaa dugsiga ilaa inta uu uga imaanayo gaadiidkii kale ee loogu beddelay.

Raacitaanka saaxiibada

Raacitaanka saaxiibada waxaa gacanta ku haya dugsiga uu ardaygu dhigto. La xiriir shaqaalaha dugsiga-si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Lambarka telefoonka

Connectbus 010 160 08 85

Busspecialisten 0470-782 782

GoAhead 0481-548 00



Waddada dugsiga oo ammaan noqoto, dhammaanteen ayaa si wadajir ah u abuurayna! Aad ayey muhiim u tahay hadaad tahay mas'uulka ilmaha inaad ka wada hadashaan xeerarka ammaanka iyo nabadgelyada ee ku qoran buuggan yar, si dhammaan ardayda raacda gaadiidka dugsiga ay u ogaadaan una raacaan xeerarka.

**Su'aalaha ku saabsan gaadiidka ardayda dugsiga waxaa ka jawaabaya mas'uulka qaabilsan gaadiidka ardayda dugsiga 0470-410 00
skolskjutsgruppen@vaxjo.se
www.vaxjo.se/skolskjuts**



**Växjö
kommun**